JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WASAARADDA KALLUUMEYSIGA IYO
KHEYRAADKA BADDA
XAFIISKA WASIIRKA

جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة الثّروة السّمكيّة
والموارد البحريّة
مكتب الوزير

FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA
MINISTRY OF FISHERIES AND MARINE RESOURCES
OFFICE OF THE MINISTER

SUMMAD:WKKHB/XW/213 /2024

Tr: 01/06/2024

Ku: Dhammaan Xubnaha Golaha. -Dowlad Gobolleedyada
Ku: Agaasimaha Guud ee WK&DH. B - Mogadishu
Og: W/kuxigeenka W.K.&KH.B -Mogadishu
Og: Wasiiru Dowlaha W.K.&DH.B -Mogadishu
Og: Garyaqaanka Dowladda -Mogadishu
Og: Wasiirka Maaliyadda -Mogadishu
Og: Xafiiska Hantidhawrka Guud Qaranka -Mogadishu

UJeedo: Soo Gudbin Xeer- Hoosaad

Wasiirka Wasaaraddu;

Markuu arkay: Sharciga kalluumeysiga **Lr008, 2023 Qod 8aad (b)**
Markuu arkay: Dastuurka KMG ah Qodobkiisa 25,45aad, xarafka (A,b)
Kaddib markay : u muuqatey baahida loo qabo nidaaminta hannaanka Golaha Maamulka iyo Horumarinta Kalluumeysiga
Kaddib markuu tixgeliyey : Baahida loo qabo Tayeynta Maareynta Kalluumeysiga

Waxa uu wareegto ku soo saarey Xeer-hoosaadka tirsigiisu yahay **Xeer/Lr/05** ee Golaha Maamulka iyo Horumarinta Kalluumeysiga ee Habka Mideysan ee Hawlgalinta (RoP)

H.E. Ahmed Hassan Adan
Wasiirka Wasaaradda

Tusmo

1. Horudhac 3
2. Ujeeddooyinka 3
3. Baaxadda 3
4. Dhismaha Golaha Maamulka iyo Horumarinta Kalluumeysiga 4
5. Shirarka 4
   Jadwalaynta 4
   Ajendaha iyo Mawduucyada 4
   Go'aan-gaarista 5
   Ka Qaybqaadashda Daneeyayaasha 5
   Dukumeentiyada 5
6. Xallinta Khilaafaadka 5
7. Habka Mideysan ee Hawlgalinta 6
8 Jadwalada 7
9. War-Murtiyeedka Golaha 16

1. Horudhac

Soomaaliya oo leh xeebta ugu dheer qaaradda Afrika, isla markaana ah goob istaraatiiji oo ku taal Geeska Afrika, sidoo kale waxay leedahay kheyraad badan oo dabiici ah, oo ay ku jiraan dhul badeed ballaaran oo kala duwan juquraafi ahaan badan, oo ka kooban Aagga Dhaqaale ee Gaarka ah (EEZ) oo ka badan 850,000 km², ayaa saldhig u ah hab-nololeedyada soo jireenka ah ee u dhexeeya dhulka oomane ee xoolo-dhaqatada dhanka waqooyiga iyo beeralayda dhulalka webiyada koofureed. Udub-dhexaadka u ah dhaqaalaha bulshada Soomaaliya waa qaybteeda badda, taas oo haysa awood aan laga faa'iidaysan oo lagu heli karo kalluumeysi waara, oo rajo wanaagsan ka leh ilaalinta cuntada, shaqo-abuurka, iyo dakhli-abuurid la taaban karo. Iyada oo la aqoonsanyahay awooddaas, Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga ayaa la aasaasay, oo loo xilsaaray kor-u-qaadida waaxda, xaqiijinta maamul wanaagga, iyo horumarinta joogtada ah ee kheyraadka badda si loo taageero dhaqaalaha xeebaha iyo ilaalinta maciishada ama hab-nololeedka bulshada. Dhaqan-gelinta sharciga cusub ee kalluumeysiga Federaalka bishii Maarso 2023 waxa uu calaamadeeyay guul muhiim ah, isaga oo dhidibada u aasay dhismaha Golaha Maamulka iyo Horumarinta Kalluumeysiga (GMHK). Ha-abuurkan waxa uu ka soo baxay baahi muhiim ah oo loo qabay maamul isku xiran, midaysan, oo loo dejiyo siyaasad, looga dan leeyahay in lagu maamulo horumar waara. (GMHK)., oo ka kooban Golaha Wasiirrada, waxa ay dejinaysaa madal wada-shaqayneed oo heer federaal iyo heer dawlad goboleed oo ka qaybgalka daneeyayaasha, wada-hadal siyaasadeed, iyo jihayn qorshaha. Dadaalkan wadajirka ah ayaa lagu doonaya in la iswaafajiyo maamulka, korna loogu qaado hab dhaqanka maamulka iyo kobcinta ka faa'iidaysiga joogtada ah ee kheyraadka badda Soomaaliya, hubinta kobaca dhaqaalaha, bedqabka cunnada, iyo ilaalinta deegaanka ee jiilasha soo koraya.

Habraaca Mideysan ee Hawlgalinta waxa uu qeexayaa habraaca iyo hab-maamuuska tafatiran ee hawlgalka waxtarka iyo hufnaanta leh ee Golaha Wasiirrada, Kooxda Farsamada iyo Xoghaynta ku lug leh Maareynta Kalluumaysiga iyo Farsamaynta Horumarinta. Waxay u adeegtaa sidii hage dhammaystiran oo loogu talagalay qabashada shirarka, diyaarinta ajandaha, doodaha, go'aan-gaarista, dukumentiyada, ka-qaybgalka daneeyayaasha, la-tashiga dadweynaha, iyo xallinta khilaafaadka.

2. Ujeeddooyinka

Ujeedada Habka Mideysan ee Hawlgalinta waa in la sameeyo hab-raacyo cad, oo la fulin karo iyo hab-maamuus maamul oo wax-ku-ool ah, isku-dubarid, iyo fulinta hawl-fulinta Golaha Maamulka iyo Horumarinta Kalluumaysiga (GMHK) Soomaaliya.

3. Baaxadda

Nidaamka Mideysan ee Hawlgalinta wuxuu quseysaa dhammaan xubnaha Golaha Maamulka iyo Horumarinta Kalluumeysiga (GMHK), oo ay ku jiraan Golaha Wasiirrada, Kooxda Farsamada iyo Xoghaynta, iyo sidoo kale dhammaan saraakiisha iyo shaqaalaha hoos yimaada Ujeeddada GMHK, hubinta si isku mid oo wax-ku-ool ah oo maareeyo loona horumariyo waaxda kalluumeysiga ee Soomaaliya.

4. Dhismaha Golaha Maamulka iyo Horumarinta Kalluumeysiga

Golaha maamulka wuxuu ka koobnaan doonaa ilaa 7 xubnood, oo kala ah DFS Putland, Galmudug, Hirshabeele , Konfuur Galbeed , Jubaland iyo Gobolka Banaadir.

Golaha Wasiirrada

Golaha Wasiirradu waxa ay hayaan doorka ugu sarreeya Golaha Maamulka iyo Horumarinta Kallumeysiga, iyaga oo qaadaya mas'uuliyadda kormeerka guud ee istiraatijiyadeed iyo jihaynta siyaasadda waaxda kalluumeysiga ee Soomaaliya. Waajibaadkooda, sida lagu qeexay Nidaamka Mideysan ee Hawlgalinta, waxaa ka mid ah samaynta iyo ansixinta istaraatiijiyadaha kalluumeysiga qaranka ee la jaanqaadaya himilooyinka horumarineed ee Soomaaliya iyo halbeegyada caalamiga ah. Goluhu waxa kale oo uu u xilsaaranyahay la socodka fulinta siyaasadaha, hubinta inay si wax ku ool ah uga qayb qaataan maaraynta waarta iyo kobaca dhaqaalaha. Intaa waxa dheer, Goluhu waxa uu door muhiim ah ka ciyaaraa kobcinta wada shaqaynta ka dhaxaysa dawladda dhexe iyo dawlad goboleedyada, la-hawlgalayaasha caalamiga ah si loo waafajiyo hab-dhaqannada kalluumaysiga ee Soomaaliya iyo heerarka caalamiga ah, iyo helitaanka taageero farsamo iyo mid maaliyadeed. Ugu dambeyntii, waxay kormeeraan dadaallada abaabulka kheyraadka, iyadoo hageysa qoondaynta meelaha mudnaanta leh si kor loogu qaado meelaha saameynta ugu badan.

5. Shirarka: Jadwalaynta

Mas'uuliyadda jadwalka shirarka kala duwan ee Golaha Maareynta iyo Horumarinta Kalluumeysiga (GMHK) ayaa si habaysan loo diyaariyey si loo xaqiijiyo nidaamyada habaysan oo waxtar leh. Xoghaynta ayaa mas'uul ka ah gaarsiinta dhammaan shirarka xubin kasta oo GMHK.

Golaha Wasiirada oo ugu sareeya qaab dhismeedkan, ayaa shirar saddexdii biloodba mar qabsanaya, waxaana shirarkan loo qorsheeyay qaab istiraatiiji ah si ay ula jaan qaadaan qorshayaasha muhiimka ah iyo halbeegyada miisaaniyadda. Guddoomiyaha Golaha, isaga oo la tashanaya xubnihiisa iyo xoghaynta, waxa uu diyaarinayaa ajandaha, isaga oo hubinaya in waqti ku habboon la gaarsiiyo xubnaha si ay u sii ugu sii diyaargaroobaan.

Sidoo kale, Kooxda Farsamada waxay isugu yimaadaan ka hor iyo ka dib shir kasta oo Golaha Wasiirrada ah. Kulamada Kooxda waxay diiradda ku saarayaan diyaarinta warbixinnada farsamada iyo qorsheynta xeeladaha fulinta ee u hoggaansan habraaca Golaha. Hoggaanka Kooxda Farsamada, iyadoo la kaashanaysa xubnaheeda, waxaa loo igmaday dejinta ajandaha, kaas oo si taxadar leh loogu habeeyey inuu waafaqo awaamiirta qorsheed ee Golaha Wasiirrada.

Xoghaynta, shirar laba-biloodle ah ayaa loo asteeyey si dib loogu eego hawlaha socda, waxna looga qabto caqabadaha maamulka iyo saadka, loona abaabulo shirarka soo socda. Madaxa Xoghaynta waxa loo xilsaaray in uu la wadaago ajandaha iyo ururinta dukumentiyada lagama maarmaanka ah si looga doodo. Waxa kale oo loo xilsaaray hawl muhiim ah ee diiwaangelinta shirarka, hubinta in dhammaan go'aannaada si sax ah loo diiwaangeliyay loona qaybiyay dib-u-eegis iyo oggolaansho.

Ajendaha iyo Mawduucyada

Ajendaha waxaa lagu diyaariyay fikradda dhammaan xubnaha ay khuseyso waxaana loo qeybiyaa xubnaha si loo siiyo waqti ku filan oo ay isugu diyaariyaan. Hoggaanka wuxuu la shaqeeyaa xubnaha kale si ay u dejiyaan ajandaha, iyagoo si dhow ula jaanqaadaya mudnaanta istaraatiijiyadeed ee Golaha Wasiirrada. Nidaamkan waxa loo qaabeeyey si loo hubiyo in aqoonta farsamo ee Kooxda Farsamada ay si wax-ku-ool ah u ogeysiiso doodaha iyo go'aannada Golaha Wasiirrada.

Sidoo kale, Xoghayntu waxay door muhiim ah ka ciyaartaa dhanka saadka iyo dejinta ajandayaasha shirarkooda, kuwaas oo ku lug leh dib-u-eegista hawlaha, wax ka qabashada caqabadaha maamulka iyo saadka, iyo qorsheynta dhacdooyinka mustaqbalka. Madaxa Xoghaynta ayaa mas'uul ka ah uruurrinta dukumentiyada lagama maarmaanka ah iyo faafinta ajendaha doodaha.

Go'aan-gaarista

1. Go'aan-gaarista Golaha Maareynta iyo Horumarinta Kalluumeysiga (GMHK) ayaa daba socotaa hannaanka habaysan ee loo dhanyahay saldhigna u ah wada shaqaynta maamulka kalluumeysiga Soomaaliya. Golaha Wasiirrada dhexdiisa, go'aannada waxaa lagu gaaraa ugu horrayn iyadoo la raacayo is-afgarad, iyadoo la koobaynayo xigmadda guud iyo ujeeddada la wadaago dhammaan xubnaha. Mar haddii is afgarad la'aan la gaari karin, waxaa la raacayaa habraaca dimoqraadiga ah, go'aannadana waxaa lagu gaarayaa cod aqlabiyad ah xubnaha goobta jooga, iyadoo la raacayo in guntan In saddex meelood labo meel (2/3) xubnaha Golaha uu buuxsamo si loo ansixiyo go'aannada. Marka ay timadao in cod la qaado, dhamaan xubanaha goloaha waxa uu mid kasta leeyahay hal cod, sida ku cad qodobaka(6) ee qaybtan (11), sidaasi daraadeed hadii aan si kale loo dhigayn, xeerkan, gudoomiyu codkiisa waxa uu noqonayaa go'aanka kama dambeysta ah ee go'aaminaya natiijada codeynta, Gudoomiyuhu waxaa uu codkiisa ku biirin kara mid kamid ah laba dhinaca hadii ay natiijadu noqoto 50/50, ama Waxa uu qaadan kara go'aan kale oo dhexdhexaad ah oo aan kabaxsanayn ajandaha.

Ka Qaybqaadashada Daneeyayaasha

Ka-qaybgalka daneeyayaasha waa arrin muhim ah oo ka mid ah hawlgallada Golaha Maareynta iyo Horumarinta Kalluumeysiga (GMHK), oo u adeegaya sidii udub-dhexaad u ah maaraynta kalluumeysiga waara ee Soomaaliya. Qaab dhismeedka Golaha wuxuu horumariyaa jiho wada shaqayneed halkaas oo daneeyayaasha muhiimka ah, oo ay ku jiraan wasaaradaha federaalka iyo gobolka, ururrada aan faa'iido doonka ahayn, bulshada qaybaheeda, iyo ganacsiga gaarka ah, ay si firfircoon uga qayb qaadanayaan horumarinta Kalluumeysiga.

Dukumeentiyada

Dukumeentiyada waxaa si taxadar leh u maamuli doona Xoghaynta. Diiwaangelin sax ah oo dhammaystiran waa lama huraan, iyada oo la diiwaangalinayo nuxurka doodaha, go'aannada la gaaray, iyo tallaabooyinka la qaadayo. Hadalqoraalka shirka oo si habaysan loo qoray waa qayb muhiim ah oo ka mid ah qaabka hufnaanta iyo isla xisaabtanka ee Golaha Maamulka iyo Horumarinta Kalluumeysga. Maxdarqoraaladan waxa loo qaybinayaa dhammaan xubnaha shirka si ay dib-u-eegis iyo u ansixin ugu sameeyaan, iyada oo la hubinayo in xubin kasta uu helo fursad uu ku xaqiijiyo saxnaanta diiwaanka ama soojeediyo wax-kabeddel. Nidaamkan dukumentiga ah ee taxaddarka leh wuxuu xoojinayaa xiriirka wax ku oolka ah ee ka dhexeeya Golaha Wasiirrada, Kooxda Farsamada iyo dhammaan daneeyayaasha kale oo ay khuseyso, iyadoo la ilaalinayo nidaam cad oo la heli karo ee habsocodka maamulka GMHK.

6. Xallinta Khilaafaadka

Khilaafka, ha ahaado mid gudaha ka dhex jira ama mid dibadda ah oo ay ku jiraan daneeyayaasha, waa in xilli hore la ogaado oo si degdeg ah wax looga qabto. Guddoomiyaha, Hoggaanka, ama

Madaxa, iyadoo ku xiran xaaladda, ayaa bilaabi doona dooddo lagu doonayo in lagu fahmo sababaha keenay khilaafka iyo xalalka suurtagalka ah.

Habka xalinta khilaafaadka ayaa la qaadan doonaa, iyadoo laga bilaabayo wada xaajood toos ah oo dhex mara dhinacyada ay khusayso. Haddii aan la xallin, waxaa loo laabanayaa sharciga Maareynta iyo Horumarinta Kalluumeysiga Soomaaliya (Somali Fisheries law no 008, 2023)

Dhammaan khilaafyada iyo faahfaahinta xalintooda waa in la diiwaangeliyaa. Dukumentiga wuxuu tixraac u noqon doonaa isku dhacyada mustaqbalka wuxuuna gacan ka gaysan doonaa horumarinta joogtada ah ee habka xallinta khilaafaadka.

7. Habka Mideysan ee Hawlgalinta

Xoghayntu waxay kormeeri doontaa oo ay isku dubaridi doontaa hawlaha qorista, dib u eegista, qaybinta iyo wax ka bedelka Habka Mideysan ee Hawlgalinta

Habkani/Nidaamkani waa dukumeenti nool waxaana lagu samayn doonaa kormeer joogto ah, qiimayn, iyo dib-u-eegis si loo hubiyo in uu sii ahaado mid waxtar leh oo la xiriira baahiyaha Habka Maareynta Kalluumaysiga iyo Horumarinta. Jawaab-celinta xubnaha, daneeyayaasha, iyo qiimeeyayaasha dibadda ayaa noqon doona mid udub-dhexaad u ah geeddi-socodkan, iyada oo dib-u-eegis lagu samaynayo sidii loo baahnaa si ay u muujiso hababka ugu wanaagsan iyo casharrada laga bartay.

Jadwalka 1-aad

Golaha Maamulka iyo Horumarinta Kalluumeysiga Shuruudaha Tixraaca Golaha Wasiirrada

Horudhac

Soomaaliya waa dal weyn oo hal qawmiyad iyo kheyraad dabiici leh. Sidoo kale leh xeebta ugu dheer qaaradda Afrika, ahna goob istaraatiiji ah oo ku taal Geeska Afrika, Soomaaliya waxay leedahay baaxad dhuleed oo dhan 637,657 km^2 iyo Aagga Dhaqaalaha Gaarka ah (EEZ) oo ka badan 850,000 km^2. Hab-nololeedka soo jireenka ah ee dalka waxaa qaabeeya xaaladaha cimilada iyo jawiga: halka waqooyiga Soomaaliya uu u badanyahay dhul oomane ah iyo dhul oomane u dhaw ah, koofurta Soomaaliya ayaa leh dhul beereed aad u sareeya, waxaana u sabab ah roobabka iyo biyaha ka imaanaya labada webi ee kala ah Jubba iyo Shabeelle. Wax soo saarka xoolaha ayaa ka mid ah arrimaha ugu muhiimsan ee ku dhawaad 85% ka soo gala Soomaaliya dhanka dhoofinta. Biyaha badda ee dalka ayaa saldhig u ah kheyraad badeed oo qiimo leh kaas oo taageeri kara kalluumeysiga waara, xeebaha iyo biyaha badda xeebta ka fog si loo xoojiyo sugnaanta cuntada, maciishada, shaqo-abuurka, dakhli-abuurka iyo kobaca dhaqaalaha.

Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga ayaa la aasaasay iyada oo ujeeddadeedu tahay in la tayeeyo waaxda kalluumeysiga iyo kheyraadka badda, muuqaalkeeduna toosiyo go'aan ka gaarista si ay u noqoto mid jawaab-celin iyo firfircooni u leh fududeynta horumarinta ku habboon kalluumeysiga. Wasaaradda waxaa loo igmaday in ay abuurto jawi suurtagelinaya in horumar waara laga gaaro dhaqaalaha kalluumeysiga xeebaha iyo bedqabka cunnada iyadoo la ilaalinayo nidaamka deegaanka kalluumeysiga ee xeebaha iyo badda Soomaaliya iyo ilaalinta bulshada ku nool xeebaha.

Bishii Maarso 2023, Sharci Lr. 008 ee 20/3/2023 oo ah "Sharciga Horumarinta iyo Maareynta Kalluumaysiga ayaa la soo saaray kaasoo horumarinaya maamulka iyo maareynta kalluumeysiga, iyadoo la taageerayo horumar waara. Sharcigan Qodobkiisa 11aad ayaa tilmaamaya in la dhiso Golaha Maamulka iyo Horumarinta Kalluumeysiga (GMHK) oo ka kooban 7 xubnood, oo ah madal rasmi ah oo wada-shaqeyn u dhexeeya Dawladda Federaalka (DFS) iyo Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka (DGXDF) ee taageeraya wada-xaajood siyaasadeed oo la isku raacsanyahay oo la is waafajiyo maamulka iyo horumarinta waaxda kalluumeysiga.

Sababta keentay in la aasaaso Golaha Maamulka iyo Horumarinta Kalluumeysiga ayaa ah baahida xooggan ee loo qabo maamul isku xira qaabeynta siyaasadda, iyo hababka dhaqangelinta si loo maareeyo loona horumariyo qaybta kalluumeysiga si joogto ah. Golaha, Kooxda Farsamada iyo Xoghaynta waa inay isu keenaan, oo ay ku jiraan Wasiirrada DFS iyo Dawladaha xubinta ka ah Federaalka (FMS), si loo kobciyo wada-shaqeyn, wadaagga xilalka, iyo go'aamo wadajir ah oo ku saabsan maaraynta kheyraadka kalluumeysiga.

Howsha loo idmaday

Golaha Wasiirrada ayaa loo igmaday in ay kormeeraan horumarinta iyo maaraynta kalluumeysiga waara ee Dowladda Federaalka Soomaaliya. Golahani waxay u adeegaan sidii hay'adda ugu sarreysa maamulka

iyo horumarinta kalluumaysiga Soomaaliya, waxaana loo igmaday xil culus oo uu qaranka ugu jihayn karo ka faa'iidaysiga iyo ilaalinta kheyraadka badda. Shaqada udub-dhexaadka ah ee golahan waa inay noqdaan cududda hagaya jihaynta istiraatijiyada, dejinta siyaasada, iyo dadaalada isku xirka ee waaxda kalluumaysiga.

Ujeeddooyiinka

Golaha Wasiirada ayaa ujeedooyinkiisu yihiin in ay si joogto ah u hubiyaan maareynta horumarinta kheyraadka kalluumeysiga Soomaaliya, kor u qaadista kobaca dhaqaalaha, bedqabka cuntada,la dagaallanka Kalluumeysiga Sharci darrada iyo ilaalinta deegaanka.

Tirada Xubnaha Golaha

Golahan ayaa waxaa hoggaaminaya Wasiirka Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, iyadoo xubno ay ka yihiin Wasiirrada Wasaaradda Kalluumeysiga Dawlad Goboleedyada xubnaha ka ah Dawladda Federaalka Soomaaliya. Golahan ayaa ka kooban xubnaha soo socda:

1. Wasiirka Kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga - Dawladda Federaalka Soomaaliya
2. Wasiirka Kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga - Dawlad Goboleedka Jubbaland
3. Wasiirka Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda - Dawlad Goboleedka Galmudug
4. Wasiirka Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda - Dawlad Goboleedka Koofur Galbeed
5. Wasiirka Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda - Dawlad Goboleedka Hirshabeelle
6. Wasiirka Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda - Dawlad Goboleedka Puntland
7. Guddoomiye Ku-xigeenka Arrimaha Bulshada - Maamulka Gobolka Banaadir

Shirarka Golaha

Jadwalka

Goluhu waa inuu kulmaa afar jeer sannadkii, iyadoo shirarka si istiraatijiyadeed loo qorsheeyey ay ka horreeyaan qorshaynta muhiimka iyo qaababka miisaaniyada, iyo sidoo kale in loo oggolaado dib-u-eegis waqtiyeysan lagu sameeyeo warbixinnada horumarka iyo dukumentiyada siyaasadda.

Dejinta Ajendaha

Guddoomiyaha, isagoo la tashanaya xubnaha Golaha iyo Xoghaynta, ayaa dejinaya ajandaha shir kasta. Qodobbada ajandayaasha waa in lala wadaagaa xubnaha ugu yaraan laba toddobaad ka hor kulanka si xubnaha ay u helaan waqti ay ku diyaargaroobaan.

Guntanka iyo Go'aan-gaarista

Guntanka shirarka Goluhu waa in uu ku furmaa saddex meelood labo meel (2/3) xubnaha Guddiga. Go'aannada waa in lagu gaaraa si wadar-oggol ah haddii ay suuragal noqoto. Haddii wadar-oggol la gaari waayo, go'aannada waxaa lagu gaari doonaa cod aqlabiyad ah xubnaha jooga.

Shaqooyinka

Kormeerid Istraatijiyadeed
Horumarinta Siyaasadda
Go'aan qaadashada
Isku-dubbaridka iyo Iskaashiga
Abaabulka iyo Maalgelinta Kheyraadka
U doodidda iyo matalaadda

Baaxadda Shaqada

- In la sameeyo qorsho heer qaran oo kalluumeysi ah oo la jaan qaadaya yoolalka horumarinta dhaqaalaha Soomaaliya iyo nidaamyada ugu wanaagsan ee caalamiga ah.
- In la kormeero hirgelinta siyaasadaha iyo istaraatiijiyadaha kalluumeysiga, iyadoo la qiimeynayo waxtarka si loo gaaro ujeedooyinka horumarineed iyo maamulka waara.
- Dejinta oo ay taageerto siyaasadaha, xeerarka iyo habraacyada qaranka ee lagu maamulayo waaxda kalluumaysiga, iyada oo la hubinayo inay kor u qaadayso waaritaanka iyo inay raacaan heshiisyada caalamiga ah.
- Dib-u-eegis iyo ansixin qorshayaasha maaraynta ilaha muhiimka ah ee kalluumaysiga, iyadoo lagu darayo tallaabooyinka ilaalinta iyo dhaqamada ka faa'iidaysiga joogtada ah.
- In la kobciyo wada shaqayn dhex marta wasaaradaha heer federaal iyo heer dawlad goboleed si loo xaqiijiyo waxqabad iyo dhaqangelin siyaasadeed oo midaysan.
- In lala xiriiro ururrada iyo daneeyayaasha kalluumaysiga heer gobol iyo heer caalami si loo waafajiyo habdhaqanka maaraynta kalluumaysiga Soomaaliya iyo halbeegyada caalamiga ah iyo in la helo taageero farsamo iyo mid maaliyadeed.
- In la oggaado oo la sugo ilaha dhaqaale ee mashaariicda horumarinta kalluumaysiga, oo ay ku jiraan deeqaha caalamiga ah, iskaashiga dawladda iyo kuwa gaarka ah, iyo qoondaynta miisaaniyada dawladda.
- In la kormeero qoondaynta iyo ka faa'iidaysiga kheyraadka si loo hubiyo in loo jiheeyo aagagga mudnaanta leh ee saameynta ugu badan.
- In uu matalo waaxda kalluumeysiga Soomaaliya goleyaasha qaranka iyo kuwa caalamiga ah, isaga oo u ololeynaya habdhaqannada iyo siyaasadaha kalluumeysiga waara.
- In bulshada lagu wacyigaliyo muhiimada ay leedahay in la maareeyo horumarinta kalluumaysiga.
- In dib-u-eegis lagu sameeyo warbixinnada Kooxda Farsamada iyo Xoghaynta, bixinta jawaabcelin iyo jihaynta horumarinta joogtada ah.

Habraaca Warbixinta

Golaha waa in la siiyaa warbixinnada horumarka saddexdii biloodba mar ee Kooxda Farsamada iyo Xoghaynta, oo ku saabsan horumarinta iyo maaraynta kalluumaysiga, oo ay ku jiraan caqabadaha iyo fursadaha. Intaa waxaa dheer, warbixin sannadeed dhammaystiran oo faahfaahinaysa guulaha, dib-u-eegista maaliyadeed, iyo jihooyinka istiraatijiyadeed ee mustaqbalka oo loo diyaarinayo daneeyayaasha iyo dadweynaha.

Jadwalka 2-aad

Golaha Maamulka iyo Horumarinta Kalluumeysiga Shuruudaha Tixraaca Kooxda Farsamada (ToR)

Horudhac

Soomaaliya waa dal weyn oo hal qawmiyad iyo kheyraad dabiici leh ah. Sidoo kale leh xeebta ugu dheer qaaradda Afrika, ahna goob istaraatiiji ah oo ku taal Geeska Afrika, Soomaaliya waxay leedahay baaxad dhuleed oo dhan 637,657 km² iyo Aagga Dhaqaalaha Gaarka ah (EEZ) oo ka badan 850,000 km². Hab-nololeedka soo jireenka ah ee dalka waxaa qaabeeya xaaladaha cimilada iyo jawiga: halka waqooyiga Soomaaliya uu u badanyahay dhul oomane ah iyo dhul oomane u dhaw ah, koofurta Soomaaliya ayaa leh dhul beereed aad u sareeya, waxaana u sabab ah roobabka iyo biyaha ka imaanaya labada webi ee kala ah Jubba iyo Shabeelle. Wax soo saarka xoolaha ayaa ka mid ah arrimaha ugu muhiimsan ee ku dhawaad 85% ka soo gala Soomaaliya dhanka dhoofinta. Biyaha badda ee dalka ayaa saldhig u ah kheyraad badeed oo qiimo leh kaas oo taageeri kara kalluumeysiga waara, xeebaha iyo biyaha badda xeebta ka fog si loo xoojiyo sugnaanta cuntada, maciishada, shaqo-abuurka, dakhli-abuurka iyo kobaca dhaqaalaha.

Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga ayaa la aasaasay iyada oo ujeeddadeedu tahay in la tayeeyo waaxda kalluumeysiga iyo kheyraadka badda, muuqaalkeeduna toosiyo go'aan ka gaarista si ay u noqoto mid jawaab-celin iyo firfircooni u leh fududeynta horumarinta ku habboon kalluumeysiga. Wasaaradda waxaa loo igmaday in ay abuurto jawi suurtagelinaya in horumar waara laga gaaro dhaqaalaha kalluumeysiga xeebaha iyo bedqabka cunnada iyadoo la ilaalinayo nidaamka deegaanka kalluumeysiga ee xeebaha iyo badda Soomaaliya iyo ilaalinta bulshada ku nool xeebaha.

Bishii Maarso 2023, Sharci Lr. 008 ee 20/3/2023 oo ah "Sharciga Horumarinta iyo Maareynta Kalluumaysiga ayaa la soo saaray kaasoo horumarinaya maamulka iyo maareynta kalluumeysiga, iyadoo la taageerayo horumar waara. Sharcigan Qodobkiisa 11aad ayaa tilmaamaya in la dhiso Golaha Maamulka iyo Horumarinta Kalluumeysiga (GMHK), oo ah madal rasmi ah oo wada-shaqeyn u dhexeeya Dawladda Federaalka (DFS) iyo Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka (DGXDF) ee taageeraya wada-xaajood siyaasadeed oo la isku raacsanyahay oo la is waafajiyo maamulka iyo horumarinta waaxda kalluumeysiga.

Sababta keentay in la aasaaso Golaha Maamulka iyo Horumarinta Kalluumeysiga ayaa ah baahida xooggan ee loo qabo maamul isku xira qaabeynta siyaasadda, iyo hababka dhaqangelinta si loo maareeyo loona horumariyo qaybta kalluumeysiga si joogto ah. Golaha, Kooxda Farsamada iyo Xoghaynta waa inay isu keenaan daneeyayaasha muhiimka ah, oo ay ku jiraan Wasiirrada DFS iyo Dawladaha xubinta ka ah Federaalka (FMS), si loo kobciyo wada-shaqeyn, wadaagga xilalka, iyo go'aamo wadajir ah oo ku saabsan maaraynta kheyraadka kalluumeysiga.

Howsha loo idmaday

Kooxda Farsamada waa qayb muhiim oo kaabaysa Golaha Maamulka iyo Horumarinta Kaluumaysiga. Iyadoo lagu saleynayo jihaynta Golaha Wasiirrada, Kooxda waajibaadkooda waxaa ka mid ah inay bixiyaan taageero farsamo iyo horumarinta siyaasadda, iyo hagitaan fulineed oo loogu talagalay maaraynta kalluumeysiga waara.

Ujeeddooyinka

Bixinta taageero, talo-farsamo iyo horumarinta siyaasad wax-ku-ool ah, iyo fududaynta hirgelinta guulaha maaraynta iyo qorshaha horumarineed ee kalluumeysiga waara ee Soomaaliya.

Tirada Kooxda Farsamda

Kooxda Farsamada waxaa hoggaaminaya Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Bulluugga ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, iyadoo xubno ay ka yihiin Agaasimeyaasha Guud ee Wasaaradaha Kalluumeysiga ee ka socda Dawlad Goboleedyada xubnaha ka ah Dawladda Federaalka Soomaaliya. Kooxda ayaa ka kooban xubnaha soo socda:

1. Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Bulluugga Xukuumadda Federaalka Soomaaliya
2. Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Bulluugga Dawlad Goboleedka Jubbaland
3. Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda Dawlad Goboleedka Galmudug
4. Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda Dawlad Goboleedka Koofur Galbeed
5. Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda Dawlad Goboleedka Hirshabeelle
6. Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda Dawlad Goboleedka Puntland
7. Agaasinka waaxda Kalluumeysiga Maamulka Gobolka Banaadir

Shirarka Kooxda Farsamada

Jadwalka

Kooxda Farsamada waxay shir kasta oo Golaha Wasiirrada ah ka hor iyo kaddib qabsanayaan kulan diiradda lagu saarayo diyaarinta warbixinno farsamo iyo dooddo kooban, halka shirarka golaha kaddib ay xoogga saari doonaan qeexidda qorshayaasha fulinta ee ku saleysan faritaannada Golaha.

Dejinta Ajendaha

Hoggaanka, oo kaashanaya xubnaha Kooxda Farsamada, ayaa diyaarin doona ajandaha shirarka, iyagoo hubin doona inuu la jaanqaado qorshaha mudnaanta u leh Golaha Wasiirada iyo go'aannada soo socda.

Dukumentiyada Shirarka

Qodobbada shirka, go'aannada, iyo qodobbada waxqabadka ayaa si toos ah loo diiwaangelin doonaa waxaana lala wadaagi doonaa xubnaha Kooxda Farsamada iyo Golaha Wasiirada si loo xaqiijiyo daahfurnaanta iyo isla xisaabtanka.

Habraaca Go'aan-gaarista

Go'aannada Kooxda Farsamada waxay noqonayaan kuwo wadar-oggol ah. Haddii wadar-oggol la gaari waayo, go'aannada waxaa lagu gaari doonaa cod aqlabiyad ah xubnaha jooga. iyadoo shir-guddoonku uu leeyahay go'aanka kama dambaysta ah haddii ay timaado in codadka ay noqdaan kuwo is le'eg ama barbardhac ah. Dhammaan go'aannada waxaa loo gudbin doono Golaha.

Shaqooyinka

Latalin Farsamo
Taageeridda Hormarka Siyaasadda
Maareynta iyo Gorfaynta Xogta
Hagidda Dhaqangelinta
Ka-qaybgalka iyo isku-dubbaridka daneeyayaasha
Korjoogteynta, Qiimaynta iyo Warbixinta

Baaxadda Shaqada

- U adeegidda Golaha Wasiirrada, ka talo bixinta dhinacyada sayniska, nidaaminta iyo hawlgelinta maaraynta iyo joogtaynta kalluumeysiga.
- Qorista, dib-u-eegista, iyo turxaanbixinta siyaasadaha, xeerarka, iyo qorshayaasha maaraynta kalluumaysiga si loo hubiyo inay ku salaysanyihiin xog cilmiyeedka ee ugu dambeeyay iyo habraacyada ugu wanaagsan ee caalamiga ah.
- Hoggaaminta dadaallada uruurinta, falanqaynta, iyo maaraynta xogta kalluumaysiga si loogu wargeliyo siyaasadda iyo geeddi-socodka go'aan-qaadashada, hubinta iyo isku halaynta saxnaashaha xogta.
- In la siiyo taageero iyo hagitaan Dawladda Federaalka iyo Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka si loo hirgeliyo xeeladaha, siyaasadaha, iyo tallaabooyinka maaraynta kalluumaysiga ee lagu heshiiyey.
- In la ogaado daldaloolada xagga aqoonta iyo xirfadaha ee ka dhex jira waaxda kalluumeysiga iyo in la horumariyo barnaamijyo tababar oo loogu talagalay saraakiisha dawladda, maareeyayaasha kalluumeysiga, iyo daneeyayaasha kale.
- Fududeynta ka-qaybgal wax-ku-oolka ah iyo isku-dubbaridka u dhexeeya qaybaha kala duwan ee daneeyayaasha, oo ay ku jiraan hay'adaha dawliga ah, ururrada aan dawliga ahayn, bulshada qaybaheeda kala duwan, iyo ganacsiga gaarka ah, si loo hubiyo hab iskaashi oo loo nidaamiyo maareynta kalluumeysiga.
- Hormarinta iyo dhaqangelinta qaab-dhismeed adag oo lagula socdo laguna qiimeeyo waxtarka nidaamyada iyo hindisayaasha kalluumaysiga, iyadoo la siinayo warbixinno joogto ah oo ku saabsan horumarka, caqabadaha, iyo fursadaha Golaha Wasiirrada.

Wadashaqeynta Xoghaynta

- La xiriiridda xoghaynta si loo jadwaleeyo shirarka golaha ka hor iyo ka dambeeya, hubinta qabanqaabada saadka iyo la wadaagidda macluumaadsi hufan oo la nidaamiyey.
- Bixinta taageero farsamo oo joogto ah iyo in la ilaaliyo aaladaha isgaarsiinta ee xoghaynta si loo fududeeyo iskudubarid wax-ku-ool ah ee hawlaha iyo socodka macluumaadka ee u dhexeeya Kooxda Farsamada, Golaha Wasiirrada, iyo daneeyayaasha kale.

Habraaca Warbixinta

Kooxda Farsamda waxay si toos ah u hoos yimaadaan Golaha Wasiirrada. Waana in ay soo gudbiyaan warbixino farsamo dhamaystiran iyo talooyin siyaasadeed wakhti ku haboon, gaar ahaan in la waafajiyo jadwalka shirarka Golaha Wasiirrada si ay ugu wargeliyaan habka go'aan-gaarista. Intaa waxaa dheer, Kooxda Farsamada waa in ay uruurisaa warbixin kooban oo sanadle ah oo si faahfaahsan uga hadlaysa hawlaha muhiimka ah ee kooxda, waxyaabihii u qabsoomay, caqabadaha la soo gudboonaaday, iyo talooyinka istiraatijiyadeed ee waxqabadyada mustaqbalka, hubinta waxtarka joogtada ah iyo hagaajinta nidaamyada maamulka kalluumeysiga.

Jadwalka 3-aad

Golaha Maamulka iyo Horumarinta Kalluumeysiga Shuruudaha Tixraaca Xoghaynta (ToR)

Horudhac

Soomaaliya waa dal weyn oo hal qawmiyad iyo kheyraad dabiici leh ah. Sidoo kale leh xeebta ugu dheer qaaradda Afrika, ahna goob istaraatiiji ah oo ku taal Geeska Afrika, Soomaaliya waxay leedahay baaxad dhuleed oo dhan 637,657 km² iyo Aagga Dhaqaalaha Gaarka ah (EEZ) oo ka badan 850,000 km². Hab-nololeedka soo jireenka ah ee dalka waxaa qaabeeya xaaladaha cimilada iyo jawiga: halka waqooyiga Soomaaliya uu u badanyahay dhul oomane ah iyo dhul oomane u dhaw ah, koofurta Soomaaliya ayaa leh dhul beereed aad u sareeya, waxaana u sabab ah roobabka iyo biyaha ka imaanaya labada webi ee kala ah Jubba iyo Shabeelle. Wax soo saarka xoolaha ayaa ka mid ah arrimaha ugu muhiimsan ee ku dhawaad 85% ka soo gala Soomaaliya dhanka dhoofinta. Biyaha badda ee dalka ayaa saldhig u ah kheyraad badeed oo qiimo leh kaas oo taageeri kara kalluumeysiga waara, xeebaha iyo biyaha badda xeebta ka fog si loo xoojiyo sugnaanta cuntada, maciishada, shaqo-abuurka, dakhli-abuurka iyo kobaca dhaqaalaha.

Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga ayaa la aasaasay iyada oo ujeeddadeedu tahay in la tayeeyo waaxda kalluumeysiga iyo kheyraadka badda, muuqaalkeeduna toosiyo go'aan ka gaarista si ay u noqoto mid jawaab-celin iyo firfircooni u leh fududeynta horumarinta ku habboon kalluumeysiga. Wasaaradda waxaa loo igmaday in ay abuurto jawi suurtagelinaya in horumar waara laga gaaro dhaqaalaha kalluumeysiga xeebaha iyo bedqabka cunnada iyadoo la ilaalinayo nidaamka deegaanka kalluumeysiga ee xeebaha iyo badda Soomaaliya iyo ilaalinta bulshada ku nool xeebaha.

Bishii Maarso 2023, Sharci Lr. 008 ee 20/3/2023 oo ah "Sharciga Horumarinta iyo Maareynta Kalluumaysiga ayaa la soo saaray kaasoo horumarinaya maamulka iyo maareynta kalluumeysiga, iyadoo la taageerayo horumar waara. Sharcigan Qodobkiisa 11aad ayaa tilmaamaya in la dhiso Golaha Maamulka iyo Horumarinta Kalluumeysiga (GMHK), oo ah madal rasmi ah oo wada-shaqeyn u dhexeeya Dawladda Federaalka (DFS) iyo Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka (FMS) ee taageeraya wada-xaajood siyaasadeed oo la isku raacsanyahay oo la is waafajiyo maamulka iyo horumarinta waaxda kalluumeysiga.

Sababta keentay in la aasaaso Golaha Maamulka iyo Horumarinta Kalluumeysiga ayaa ah baahida xooggan ee loo qabo maamul isku xira qaabeynta siyaasadda, iyo hababka dhaqangelinta si loo maareeyo loona horumariyo qaybta kalluumeysiga si joogto ah. Golaha, Kooxda Farsamada iyo Xoghayntu waa inay isu keenaan daneeyayaasha muhiimka ah, oo ay ku jiraan Wasiirrada DFS iyo Dawladaha xubinta ka ah Federaalka (FMS), si loo kobciyo wada-shaqeyn, wadaagga xilalka, iyo go'aamo wadajir ah oo ku saabsan maaraynta kheyraadka kalluumeysiga.

Howsha loo idmaday

Xoghayntu waa mid doorwayn ka qaadanaysa loona xilsaaray isku xirka hawlaha, fududaynta xiriirka, iyo hubinta habsami u socodka hawlaha maamulka kalluumaysiga iyo haykalka horumarinta dawladnimo.

Ujeeddooyinka

Golaha Wasiirada iyo Kooxda Farsamada in ay siiyaan taageero dhanka saadka iyo isku dubaridka maamulka hufan, fududaynta go'aan qaadasho wax-ku-ool ah iyo fulinta siyaasadaha horumarinta iyo maamulka kalluumaysiga.

Tirada Xoghaynta

Xoghaynta waxaa hogaaminaya wakiilka Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, iyadoo ay xubno ka yihiin wakiillada Wasaaradaha Kalluumeysiga ee ka socda Dawladaha Xubnaha ka ah Federaalka Soomaaliya (FMS). Xoghayntu waxay ka koobantahay xubnaha soo socda:

1. Xoghaynta Kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Bulluuga
2. Xoghaynta Kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Bulluuga
3. Xoghaynta Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda.
4. Xoghaynta Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda.
5. Xoghaynta Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda
6. Xoghaynta Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda
7. Xoghaynta Kalluumeysiga

- Xukuumadda Federaalka Soomaaliya
- Dawlad Goboleedka Jubbaland
- Dawlad Goboleedka Galmudug
- Dawlad Goboleedka Koofur Galbeed
- Dawlad Goboleedka Hirshabeelle
- Dawlad Goboleedka Puntland
- Maamulka Gobolka Banaadir

Shirarka Xoghaynta

Jadwalka

Kulamada Xoghayntu waxay qabsoomayaan labadii biloodba mar si ay dib-u-eegis ugu samayso hawlaha socda, waxna uga qabato caqabadaha dhanka maamulka iyo saadka, iyo qorshaynta kulmada soo socda.

Dejinta Ajendaha

Ka hor shir walba, Madaxa Xoghayntu waxa uu xubnaha kale la wadaagayaa ajandaha si loo ururiyo dukumeentiyada iyo warbixinnada lagama maarmaanka ah in laga dooddo.

Dukumentiyada kulanka

Xoghaynta ayaa mas'uul ka ah diiwaangelinta qoraallada kulan kasta, oo ay ku jiraan go'aamada la gaaray iyo waxyaabaha fulin loo xilsaaray. qoraalka kulamada waa in loo qaybiyaa dhammaan xubnaha laba toddobaad gudahood si dib loogu eego kaddibna loo ansixiyo.

Habraaca Go'aan-gaarista

Xoghayntu ma lahan habraac go'aan-qaadasho, dhammaan baahiyaha waxa loo gudbin doonaa Guddiga `farsamada ee Golaha Maamulka iyo Horumarinta Kalluumeysiga si ay tallaabo u qaadaan.

Shaqooyinka

Xiriirinta Kulamada
Maamulka Dokumentiyada
Fududeynta Isgaarsiinta
Ka caawinta saadka
La wadaagidda Macluumaadka
Taageeridda dhanka Maamulka

Baaxadda Shaqada

- Diyaarinta iyo jadwalaynta dhammaan kulamada Wasiirrada iyo Kooxda Farsamada, oo ay ku jiraan sugidda amniga goobaha shirka, diyaarinta ajandayaasha, iyo qaybinta dukumentiyada la xiriira.
- Diyaarinta, qaybinta, iyo kaydinta qoraallada kulamada, warbixinnada, dukumentiyada siyaasadaha, iyo arrimaha kale ee khuseeya.
- U adeeggidda Wasiirrada, Golaha Maamulka iyo Horumarinta Kalluumeysiga, iyo daneeyayaasha kale.
- In la siiyo taageero saadka xiliyada la qabanayo xafladaha, aqoon-is-weydaarsiyada, iyo hawlaha kale ee ay abaabulayan maamulka kalluumeysiga iyo qaab-dhismeedka maamulka horumarinta.
- In daneeyayaasha lala socodsiiyo siyaasadaha, go'aannaada, iyo horumarka ka jira waaxda kalluumeysiga.

- In la siiyo taageero maamul Golaha Maamulka iyo Horumarinta Kalluumeysaga, oo ay ku jiraan maaraynta miisaaniyadda, soo iibsiga, iyo iskudubarid kulamada farsamo iyo adeegyada latalinta.
- In uu gacan ka geysto la socodka fulinta siyaasadda iyo diyaarinta warbixinnada horumarka ee iyo Golaha Maamulka iyo Horumarinta Kalluumeysaga.

Iskaashiga Golaha Maamulka iyo Horumarinta Kalluumeysiga

- In awaamiirta iyo go'aannada Golaha loo fuliyo si wax-ku-ool ah, iyadoo la siinayo warbixinno wakhtiyeysan iyo warbixinno cusub oo ku saabsan horumarka.
- Fududeynta hawlaha Golaha Maamulka iyo Horumarinta Kalluumeysiga iyo isku dubaridka kulamada, faafinta warbixinnada farsamada, iyo taageeridda horumarinta siyaasadda.

Habraaca Warbixinta

Xoghayntu waxay hoos timaadaa Kooxda Farsamada. Xoghaynta ayaa mas'uul ka ah diyaarinta iyo soo bandhigidda warbixinnada labadii biloodba mar ee ku saabsan hawlaha FMDC, caqabadaha maamulka, iyo horumarka hawlaha loo xilsaaray ee Golaha Maamulka iyo Horumarinta Kalluumeysiga. Xoghayntu waxay kaloo ka taageertaa Golaha Maamulka iyo Horumarinta Kalluumeysiga ururrinta warbixinnada iyo xogta iyo/ama macluumaadka la soo codsaday.

War-murtiyeed ku saabsan shirka 3aad ee Golaha Maareynta iyo Horumarinta Kalluumeysiga (FMDC)

Dhuusamareeb, 28 – 29 May 2024

Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo wasaaradaha kalluumeysiga iyo kheyraadka badda ee dowlaha xubanaha ka ah dowladda federaalka ayaa shir wadatashi ah ku yeeshay magaalada Dhuusamareeb 28kii – 29kii Bisha May ee 2024.

Shirkaan oo ah kii 3aad ee **Golaha Maareynta iyo Horumarinta Kalluumeysiga** waxaa diiradda lagu saaray xoojinto wadashaqeynta u dhaxeysa Wasaaradaha heer Federaal iyo heer dowladaha xubnaha ka ah dowladda federaalka, Warbixinta iyo hadafka horumarinta Kalluumeysiga, ka doodista iyo Hirgalinta Habraacyada Golaha Maareynta iyo Horumarinta Kalluumeysiga (FMDC) iyo mudnaan siinta ka hortagga kalluumeysiga xad-dhaafka ah, Jiilaabashada noole biyoodka dabar go'aya, la dagaallanka Kalluumeysiga sharci darrada ah iyo la socoshada saameynta isbadalka cimilada ee deegaan xeebeedyada.

Shirka 3aad ee Golaha Maareynta iyo Horumarinta Kalluumeysiga Soomaaliyeed ayaa laga soo saaray qodobbada soo socda:

A) Xoojinta Wadashaqeynta labada heer ee Dowladda ee dhinaca Kalluumeysiga:

1. Shirku waxa uu hoosta ka xariiqay mudnaansiinta xoojinta iyo kor u qaadidda wadashaqeynta Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga ee JFS iyo wasaaradaha Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda ee Dowladaha Xubnaha ka ah dowladda Federaalka.

2. Shirku waxa uu dood adag ka yeeshay islamarkaana uu meel mariyey habraacyada iyo hannaanka mideysan (RoPs,ToRs) ee howlgalinta Golaha Maamulka iyo Horumarinta Kalluumeysiga Qaranka.

3. Goluhu waxa uu ayyiday muhiimadda ay leedahay daadajinta adeegyada horumarinta Kalluumeysiga taas oo kaalin wax ku ool ah ka qaadan doonta hirgalinta qorsheyaasha mideysan ee lagu horumarinayo Kalluumeysiga iyo ka faa'iideysiga kheyraadka Kalluumeysiga waara.

B) Ka hortagga la dagaalanka kalluumeysiga Sharci darrada ah iyo Kalluumeysiga Xaddhaafka ah

I. Goluhu waxa uu isla qaatay in go'aanno mideysan laga soo saaro Kalluumeysiga Xaddhaafka, Jillaabashada nuucyada Kalluun ee dabar go'aya iyo llaalinta deegaanka iyo noole biyoodka si looga fogaado xaalufinta iyo dhibaatada gaari karta deegaan xeebeedka.

II. Goluhu waxa uu isla qiray saameynta Kalluumeysiga sharci darrada ah uu ku lee yahay dalka iyo sida ay muhiim u tahay in la hirgaliyo qorsheyaal cad cad oo looga hortagayo lagula-na dagaallamayo Kalluumeysiga sharci darra ah.

C) Cilmi-baarisyo, kor u qaadiida wax soosaarka gudaha iyo xoojinta dhoofinta Kalluunka

1. Goluhu waxa uu faray Agaasimeyaasha guud ee Wasaaradaha kalluumeysiga ee heer federaal iyo heer Dowlaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka in ay diyaariyaan qorsheyaal mideysan oo horseedaya in cilmi-baarisyo waxtar leh lagu sameeyo wasaqowga badda, waxyaabaha ku soo caariya xeebaha iyo saameynta isbadalka cimilada ee deegaannada xeebaha.

2. Si loo dhiirigaliyo wax soosarka Kalluumeysiga gudaha Goluhu waxa uu isla qaatay in la taageero Kalluumeystada gudaha, la abuuro fursado wax ku ool ah iyo in loo sameeyo suuqyo Kalluumeysi oo casri ah. Sidoo kale Goluhu waxa uu bogaadiyey shirkadaha Kalluumeysi ee Maxaliga ah ee ku howlan dhoofinta Kalluunka waxaana la faray in ay raacaan habraacyada jillaabaashada Kalluunka iyo Taya-dhowrka Kalluunka ee Wasaaradda Kalluumeysiga ee heer federaal.

3. Si loo horumariyo hufnaanta bixinta ruqsadaha iyo diiwaangalinta shirkadaha Kalluumeysi ee Maxaliga ah Goluhu waxa oo mudnaan gaar ah siinayaa mideynta ruqasadaha heer federaal iyo heer dowladaha xubnaha ka ah dowladda Federaalka Soomaaliya islarmarkaan la abuuro nidaam ay wada adeegsan karaan Wasaaradda Kalluumeysiga ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo Wasaaradaha Kalluumeysiga ee Dowlaha Xubnaha ka ah dowladda Federaalka.

4. Galahu wuxuu isla qaatay in la sameeyo xog uruurinta waxsoosaarka kalluumeysiga isla markaana lagu daro barnaamija FSNAU si loo sugo sugnaanta cunnada.

D) Misaaniyadda Golaha iyo waqtiyenta shirka xiga ee FMDC

1) Goluhu wuxuu adkeeyey in miisaaniyad gaar ah loo helo xoghaynta golaha (**FMDC secretariat**) si ay ugu suuragasho in ay waajibaadkooda shaqo u gutaan, islamarkaana ay qaban-qaabiyaan shirarka golaha.

2) Goluhu wuxuu isla qaatay in shirka xiga ee Golaha uu qabsoomi doono inta u dhexeys 25-ta ilaa 30-ka bisha Sebteembar ee 2024 wuxuuna ka dhici doonaa Magaalada Jowhar ee Caasimadda Dowlad Goboleedka Hirshabeelle.

E) Mahadnaq iyo Gunnaad

1) Goluhu wuxuu u mahad naqayaa Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Kheyraadka badda ee Dowlad Goboleedka Galmudug, howl wadennada golaha maareynta iyo horumarinta Kalluumeysiga iyo Khuburada ka soo qeybgashay shirka 3aad ee Golaha.

"DHAMMAAD"

H.E Ahmed Hassan Aaden - Wasiirka Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga ah ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya

H.E Garaad Yuusuf Maxamuud – Wasiirka Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda ee Dowlad Goboleedka Galmudug.

H.E Axmed Xassan Cumar - Wasiirka Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga ah ee Dwolad Goboleedka Jubaland.

H.E Abdifatah Mohamed Ali – Wasiirka Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda ee Dowlad Goboleedka Koofur-Galbeed.

H.E Iidle Siyaar Sheikh Khalif - Wasiirka Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda ee Dowlad Goboleedka Hirshabeelle

H.E Cabdicasiis Cismaan Maxamed – Guddoomiye ku xigeenka arrimaha Bulshada ee Maamulka Gobolka Banaadir